# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 43aad Fadhiyadii 2aad 3aad

**Axad & Isniin 19, 20 July 2020**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 43aad

**Gudoomiyaha Baaashe Maxamed Faarax;** Fadhigii shaley waxaa mudanayaasha loo qeybiyay ajendaha kal-fadhiga 43aad, markaa manta waxaynu bilaabeynaa dooda ajendaha xildhibaanada raba in ay ka doodan ha is qoraan, xog-hayntuna ha u qaybiso waraaqaha.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin (4min 15sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Guddoomiye waan idin salaamayaa adiga iyo xildhibaanadaba Waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax mataulahi Wa barakaatu.

Marka hore sida qodobada ajendaha ee xaararku u diyaarsan yihiin wax ha laga bedelo, waayo xeerka doorashooyinka ee guud inaanu diyaar ahayn ayaan u malaynayaa, haddii aad idinku haysaan mooyaane, waxaan filayaa inaanay Guddidu aanay fadhiisan, hadii aanay guryaha ku shaqayn.

Waxaan odhan lahaa **Xeerka shaqaalaha Rayidka** ee aan anigu gacanta ku hayo ha loogu soo horaysiiyo oo aanu soo bandhigno kaa ka riixa oo ka danbaysiiya hadii uu diyaar idiin yahay kana dhiga **2aad Xeerka doorashada**, sidoo kale waxaan **qodobka 3aad** ka dhigayaa wax-ka-bedelka iyo kaabista xeerka Furashada Nidaamka Ururada iyo Asxaabta, waayo waa xeer aad u mihiim ah, waa xeer dhaliilo farabadani ka muuqdaan.

Guddoomiye waxaan moodayay in uu xeeka saxaafadu uu la yaalo xaga Wasaarada, waxananu ku balanay in Golaha Wasiirada la keeno sidaasna inoogu yimaado, hadana waxa uu inoogu jiraa Ajandahan maanta ina horyaala, taasna waxaan doonayaa in aad faah-faahin ka bixisaan sida uu ku soo galay Golahan?.

**Qodobka 4aad ha laga dhiga Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada.** Waxa kale oo aan odhan lahaa kow ha laga dhigo xog-ogaal u noqoshada xaalada guud ee Qaranku ku sugan yahay waayo Golahani inbadan ayuu kala maqnaa waxaana fiican in la iswaraysto, waayo xanuuno ayaa ina soo maray, marxalado faro badan ayuu dalkani galay oo haddii shir-guddoonku wax soo kordhinayo iyo haddi

xildhibaanadu war hayaan inla wadaagaan. Waxa kale oo aan odhan lahaa ha lagu daro u yeedhista Wasaaradaha qaar sida Wasaarada Caafimaadka, Wasaarada Arrimaha Dibedda, Wasaarada Qorshaynta iyo Hay'ada Shaqaalaha waayo xaalado badan oo Covid 19 ka mid yahay iyo arrimo kale ayaa jira.

**Md. Xuseen Maxamed Cige** **(2min 18sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Marti Sharafta, Saxaafada iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa. Waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax mataulahi Wa barakaatu.

**Qodobka 1aad ee Xeerka Doorashada** halkiisa ayaa u daayey **Qodobka 4aad** waxaan keenay **Qodobka 2aad**, **Qodobka 3aad** halkiisa loo daayo, **Qodobada 5aad iyo 11aad** waxaan ka dhigayaa kuwa ku sii xiga. Xeerarka ka soo noqday Madaxweynaha ee kala ah **Qodobada 3aad, 5aad iyo 11aad** ha la soo hormariyo oo sideeda u socodsiiyo.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(2min 16sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Marti Sharafta, Saxaafad iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa. Waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax mataulahi Wa barakaatu.

**Qodobka 1aad ee Xeerka Doorashooyinka** halkiisa ayaan u daynayaa. **Qodobka 14aad** waxaan ka dhigayaa **Qodobka 2aad** oo ah Xeerka Nidaamka ururada iyo Asxaabta. Waa xeer baahi weyn loo qabo. Waa in lagu daraa xeerkaas Musharax madax bannaan waayo dad badan ayaa danaynaya inay talada dalka qayb ka noqdaan oo xaqna u leh waa qodob.

**Xeerka Tamarta** waxaan ka dhigayaa **Qodobka 3aad** oo waa xeer isna baahi badan loo qabo. **Qodobka 4aad** Xeerka la dagaalanka Mukhaadiraadka. Intii Goluhu maqnaa hawl badan ayaa ka jirtay markaa isna waa muhiim.

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa** **(5min 05sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Marti Sharafta, Saxaafad iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa. Waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax mataulahi Wa barakaatu.

Marka hore waxaan soo jeedin lahaa Gole ahaan in aynu ka shaqayno wax kasta oo suurto galinaya qabsoomida Doorashooyinka Golaha Deegaanka iyo Golaha Wakiilada xeerarka khuseeyana aynu xaga soo marino. Waayo in badan ayaa dadka laga dhaadhiciyey in aynu mushkilada qayb ka nahay. Is qabqabsiga Xisbiyada Qaranka ayaa dib u dhigay Doorashooyinka oo aanay Golaha Wakiilada iyo Guurtiduna shaqo aanay ku lahayn. Waxaan idin soo jeedin lahaa in dhammaan xeerarka halka ku jira iyo kuwa

ka maqan aynu ku soo darno ajendaha oo aynu noqono Gole diyaarinaya xeerarka Doorashooyinka.

**Qadobka 1aad** waxan ka dhigayaa Xeerka Doorashooyinka. **Qodobka 2aad** waxaan ka dhgayaa **Xeerka Nidaamka ururada iyo Asxaabta** waa qodob muhiim oo isna loo baahan yahay, waayo furashada ururada iyo Golaha deegaanku isku wakhti ayey ahaayeen. Markaa waa in aynu salamayno furashada ururada iyo doorashada dawladaha hoose isku mar u dhacaan.

**Qodobka 3aad** Xeerka saxaafada ayaa ka dhigayaa oo 10 kal-fadhi lagu soo darayey oo inta laga saaray hadana lagu soo celiyey oo aan filayo inuu Golaha yaalo Guddiduna hawshooda ha ka qabsato. **Qodobka 4aad** waxaan ka dhigayaa Wax ka bedelka Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah. **Qodobka 5aad** Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Xeerka Tamarta.

Waxaan odhan lahaa seddexda xeer Doorashada, Xeerka Saxaafad, Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah, Xeerka Tamarta iyo Xeerka Sahaminta shidaalka aynu tododbadaas xeer oo kaliya ajendahan ku eekayno si la inoogu arko dad diyaarinaya xeerarkii doorashada.

**Md. Maxamed X. Yuusuf Axmed (Waabeeye)** **(9min 34sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Gudoomiye waad mahadsantahay, mudane Ibraahim Mahdi ayaan meelo badan iska mid nahay, Gudoomiye maadaama oo ay jiro dabayl doorasho waxaan leeyay waa in ay ka muuqataa Goleheenan, waxaanse aan rumaysnahay in golahani uu diyaar u yahay hawshaa iyo dardar-galinteedaba iyo in doorashii la qabtaba.

Ajandeheena waxaa ku jira Xeerka doorashooyinka Guud ee Qaranka iyo Diwaan Galinta Codbiyayaasha oo ah qodabka 1aad ah taas oo muujinaysa in aynu doorasho diyaar u nahay.

Xibiyada Qaranku waxay cayimeen Mudo 2020-ka ah iyada oo aynu ogmahay habka uu xeerku dhigayo in ay komishanka doorashooyinku cayimayaan xiliga ay doorashadu dhacayso una soo gudbinayaa madaxweynaha si uu isagu wakhtiga cayimayo, Xisbiyadu iyagaa wakhtiga qabanaya hadana komishanka sugaya, waxaad moodaa in ay iyagu safiirkii EU-da la shirayaan hadana safiirkii odhanayo Kootada ha la ansixiyo, xibiyaduna leeyihiin xiligan kooto lagama gaadhsiin karo; "*Xildhibaan Buubaa Ajandaha uun ku ekaw shaqadaada maahee*" "*Gudoome baasha udaa mudanaha doodiisa*". Xibiyadu iyagaa xubnohoodii komishanka marna ku soo dara, xibiyadu iyagaa marna yidhaa 9xubnood nooga dhiga, marna 7xubnood Ogolaada, xisbiyadu iyagaa marna yidhaahada doorashada waxaa qabanaya komishankii hore oo lagu daray komishankii ka sii horeeyay iyo Sadex Gaal iyo mid madaw oo laga daba geeyay hadana iyagaa diida oo yidhaa waanu iska daynay taa.

Xibiyada iygaa TEMU (Technical Election Management Unit) hadana iyagaa yidhaa iska daaya, xibiyadu iyagaa islaaya Gudoomiye hadana heshiiya, iyagaa laba laba u saaxiiba

midna gooni u saara, *Gudoomuye Baashe Ajandaha ku soo noqo Xildhibaan;* Xibiyadu iyagaa Riyo Raac Diida Hadana ansixiya, markaa waxaas oo waxaas oo hawl ahi wax inaga ina khuseeya maaha, mar Gole ayaynu nahay, mar Asxaab ayaynu nahay, marna gobolo ayaynu nahay, maantana waxaynu ka hadlaynaa in aynu gole ahaan aynu waajibaadkeena guno ayaynu ka hadlaynaa waxaana ugu jeedaa in aynaan gole haan qaladka doorashada lahayn.

**Point Of Order Abdiqaadi Jirde;** xildhibaan wax kale ku odhan maayee

**Xildhibaan Buubaa** point of order waxaad qaadan kartaa marka xeer laga hadlayo.

**Abdiqaadir jirde** waxaan ku leeyahay sadexda Xisbiba waa inaad sheegtaa.

**Gudoonka:-** Xyidhibaan waabeeye doodaada sii wado ajandahana ku soo noqo; Md. **Waabeye:-** Gudoomiye waxaan u jeedaa qodobkaa 1aad ee doorashooyinka bal inta meel ay isla imanayaan in aan golaha wakiilada loo arag carqalad, qodobkaa kamaan dhigeen qodobka 1aad, markaa waxaan ugu soo horaysiin lahaa xeerarka dalku u baahan yahay sida Xeerka Shidaalka, Xeerka Tamarta Gudoomiye waynu ansixinay Madaxweynahaana wax ka beddel ku soo sameeyay qodobo ka mid ah oo ay ka mid yihiin qodobka 6aad farqadiisa 2aad oo sheegaya xubaha tamartu meelaha ay ka kala imanayaan oo aynu ku ansixinay in 3xubnood ka imanayaa Ururka Tamarta, 1 xubin oo khabiir ku ah Korontada, 1xubin oo dawladaha hoose ah, 1xubin oo khabiir ku ah sharciyada iyo 1xubin oo ka timaada wasaarada Macdanta.

Sidaa awgeed Madaxweynuhu wuxuu wax-ka-beddel ku soo sameeyay qodobkaa waxanu yyidhi Qodobkaa todobada xubnood waxaa soo magacaabaya madaxweynaha waanu magacaabay xeerkiina wax ka beddelkiisa maynaan ansixin, taasina sharciga ma waafaqsana waxayna ahayd in uu la sugi ansixinta xeerka. Waa in aynu xaga hore ka soo dhignaa.

Xeerka maamuuska madaxweynaha iyo Golayaashana waa in aynu muhiimada siinaa isna, xeerka sahaminta iyo soosaarista shidaalka iyo xeerka dakhliga oo anaga diyaar ah waan soo horaysiinayaa waanan ka baxay waad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(7min 41sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo saxaafadaba waan salaamayaa, Qodobka 3aad ee Ajandaha waxaa inoo caado ahaan jirtay in halkaa warbixina ka danbaysa ee aynu galin jirnay xog-ogaal unoqoshada xaalada dalka, waxaan soo jeedinayaa in la galiyo uyeedhida Wasiirada Xukuumada, sida hortay laga dhawaajiyay in aynu masuuliyiinta dalka u yeedhno si ay xog-ogaal inooga siiyaan waxyaabo badan oo jira, tusaale ahaan wasaarada caafimaadka iyo xanuunadan hada jira iyo dakhligiisii iyo waxyaabihii ay umadu ugu deeqdayba, sidoo kale arimaha dibada iyo shirarkii, meelo badan oo ay

su'aalo inaga wareegayaan ayaa loo baahan yahay in ay iftiimiyaan. (1 mudane ayaa taageeray).

Hadii aan galo qodobada kale ee Ajandaha inoogu qoran sida ay u kal muhiimsanyihiin ugu horayn waxaan taageerayaa in Qodobkaa 1aad ee ka hadlaya Doorashooyinku in uu halkiisaa ku jiro waanan ku taageersanahay Mudanayaashii hortay ka dhawaajiyay, waxaan se ku darayaa halkaa xeer guud oo la isku dhafay oo mid walba sidiisa u ansaxsan yahay ayaa meesha hadana maraya, oo meelo yar-yar uun wax laga soo bedelay oo xeerarka intooda badani ay yihiin sidii hore ayaa ina hor imanaya, xeer aan qodobada qaar aan waxka bedel ku iman oo isaga oo sidiisii ah la ina hor keeno hadana gacanta loo taago anigu maan garan.

Xeerarka wixii dhaqan gal ahi waa dhaqan gal ee wixii wax ka beddel ah ayuunbaa lagu soo dari jiray dabadeed garyaqaanka guud ayaa is barbar dhigi jiray oo wixii xeerka lagu kordhiyay uun galin jiray xeerka, markaa waxaan leeyahay ama aan soo jeedinayaa si aanu wakhti inooga qaadan in wixii wax ka beddel ah uun la keeno Golaha. (1mudane ayaa taageeray)

Xeerkaasi marka uu qodobka 1aad noqdo waxa uu saamayn ku yeelayanaa **xeer Lr 14**, waayo xeerkaa hore waxaynu ula jeednaa in doorashooyinka qorshaysan ee isku dhafan ee golayaasha Deegaanka iyo Wakiilada lagu qabto oo ay suuro galiyaan ayaynu ula jeednaa, Golayaasha Deegaankuna sidii hore loo sheegay waxay ku qabsoomi jireen xili ururo tartamayaan, markaa doorashada soo socota ee Ururada oo hada ay ka hadhsantahay mudo sanad ka yari, muxuu xeerku ka odhanayaa waa in la isweydiiyaa ilayn waa laga qaaday ururadu wixii ay ku tartamayeene, markaa waxaan soo jeedinayaa maadaamo oo ay isa saamaynayaan in labadaa xeer la isku xigsiiyo ayaan soo jeedinayaa.

Xeerka mukhaadaraadka ee ajandaha inoogu qoran waxaa kale oo jira xeer kale oo dhaqan gal ahaa, hadana waxaa ina hor yaala xeer kale oo akhriskii 1aad mayara markaa waxaan soo jeedinayaa in uu ku yimaado Qaab wax-ka-beddel oo kii hore waxa laga badelayo wax lagu kordhinayo oo uu noqdo Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Mukhaadaraadka.

Sidoo kale waxaa isna kaas la mid ah xeerka Saxaafada oo hore u jiray, markaa waa in isna kii hore lala eegaa oo wixii kii hore iska bedelaya iyo wixii ku biiraya waa in la isla eegaa oo uu dhigamaa sidan Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Saxaafada, oo hawlaha marba uu Golahani uu galayaa inoo kala soocmaan oo marka uu xeer isku dhami inoo imanayo in marka uu wax-ka-beddel inoo imanayo waa in uu kala duwanaada, intaas ayaan kaga baxayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal** **(7min 55sec):-** Gudoomiye waad mahadsantahay, mudanayaal idina waad mahadsantihiin , sida uu barnaamij kani u qoranyahay ama ajandahani wuxuu iila muuqdaa mid qurux badan guud ahaan, laakiin waxaan qabaa in

Shirgudoonka iyo Guddida Joogtada ahi ay Golaha ugu horayn warbixin siiyaan ayaan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in ajandahan la hor-mariyo Xeerarka Golaha horyaala imika, inta aynu dib u dhigano kuwa Guddiyada horyaal oo aynu waa jibkeena ka gudano kuwa in horyaala, marka laga reebo xeerka doorashooyinka.

Sidii mudanihii iga horeeyay uu sheegay Xibiyadu arin ayay ku leeyihiin dalka, hadana sida hada muuqata masuuliyadiiba tuurta ayay ku qaateen, Golahana lagu shaabadeeyay niman diidan doorashooyinka oo iska fadhiya meesha 15-sanadood, sida aad ogtihiin Golahani ma qabto doorashada ee waa la qaban lahaa oo Golihi badali lahaa ayaa la keeni lahaa, markaa waxaan leeyahay kalmadan ah anagaa wax walba ah in meel la isla dhigo.

Markaa marka ay leeyihiin xibiyadu anigaa go'aanka gaadhayna, anigaa shirwalba ka qayb galaya, anagaa caalamka la hadlaaya, taasi mid soconaysa maaha ee talada waa la wada leeyahay.

Kaw Waxaan soo jeedinayaa in Ururada wakhtigooda laga soo horumariyo oo hada la furo, si looga maarmo Golayaashan inta badan fadhiyay hadii ay Deegaan yihiin iyo hadii ay yihiin Wakiilaba, si umada muhmalka la galiyay looga saaro in cid wax diidaysaa jirto. Sadex sida hada la sheegayo waxaa la leeyay 14cisho guda hood ha soo sheegeen komishanku waxkhtiga ay doorayasha qabanayaan, si intaaba looga baxo.

Labada xeer ee kala ah Xeerka la Dagaalanka Mukhaadaraadka iyo Xeerka ka Hortaga iyo Xakamaynta kaganacsiga iyo Tahriibka Daka, waa in aynu aad ugu shaqaynaa isna dhaafinaa labadaa Xeer ayaan soo jeedinayaa, waxaa kale oo aan intaa ku darayaa xeerkaa sahaminta shidaalku diyaar nagama aha ka gudi ahaan.

Waxaanan soo jeedinayaa in xeerarkaasi aan is dultaagay iyo kuwii kale ee la sheegayba sida ay u kala mihiinsanyihiin aynu usoo kala horu marrino ayaan soo jeediyaa waad mahadsantihiin.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye** **(7min 30sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo saxaafadaba waan salaamayaa, waxaanan idinku salaamayaa salaanta islaamka ASC, Runtii waxaan maanta u fadhinaa fadhigii Golaha wakiilada, waxaana ina horyaala ajandaha kal-fadhiga 43aad ee Golaha wakiilada, anigu dood badan soo jeedin maayo ee waxaan soo jeedinayaa laba qodob ama sadex.

Ugu horayn waxaan kala horaysiin lahaa mashaariicda sharci ee ina horyaala iyo Uyeedhista wasiirada Xukuumada oo aan horaysiinayo u yeedhista Wasiirada sababta oo ah xukuumadu waxay xambaartay hawlihii oo dhan hadii ay noqon lahay Maxkamadaha iyo Golayaasha xeer dajintaba, waxaanad moodaa in iyada mooyaane aanay cid kale jirin, markaa waa in wasiirada xukuumada ka masuulka ah la weydiiyaa waxyaabaha sharci darada ah ee ay ku kacayso xukuumadu, waxaanan magacaabi lahaa

in ay Golaha horyimaadaan, sida Maareeyaha Duulista hawada oo ku tagri falay hawlo badan oo uu u xilsaranyahay oo ay ka mid ahaayeen 16 shaqaale ah oo loo tababaray hawlaha amniga madaarka oo ay amaani ka soo gaadhay dadka iyo dalkaba oo uu fadhiisiyay mushaharkoodana ay fadhiga ku qaataan.

Iyada oo ay dhamaantood yihiin niman dhalin yaro ah, markaa taasina waxay ka hor imanaysaa siyaasada guud ee lagu dhiiri galinayo dhalin yarada dalka oo hadii ay wax tabanayaan si wanaagsan oo maan-gal ah loola hadlo, wasaarada caafimaadku waa laga maarmaan in laga warayso hawlaha xanuunadan hada dunida ka jira, iyo dhalinyadii faraha badnaa ee loogu yaboohay dibad iyo gudaba oo ay shacabku ogaadaan inta uu xanuunkani gaadhsiisanyahay.

Sidoo kale waxaa isagana laga maarmaan ah in uu Wasiirka Wasaarada Horumarinta maaliyadu uu horyimaad golahan oo wax laga weydiiyo dhaale ma loo hayaa arimaha doorashada ee laga hadlayo. Sidoo kale waa mudo kooban inta ka hadhay mudadii ay golaha wakhtigoodu ka dhamaanayay ee waa in la sugaa si loo qabto iyaga oo diyaar ah doorashadii, Maadaama oo uu golahani yahay Xeer-dajinta Rasmiga ah anagaa ka masuul ah wixii xeerar ah inta aan joogno inta ay la soo dooranay gole kale oo na-badalaya, wixii sharci dara ah ee dhacana waanu daadifaynaynaa waananu ka hor tagaynaa oo waa in golahi uu waajibkiisa gutaa ayaan leeyahay.

Xeerarka uu madaxweynuhu soo celiyay waxaa inoo yaala ama xeer-hoosaadka Golaha inoogu qoran in wixii xeer ah ee uu madaxweynuhu wax-ka-beddel uu ku soo sameeyo in guddidii lagu celiyo oo ay talo soo jeedin sameeyaan oo wixii ay talo u arkaan golaha u soo gudbiyaan.

Halka laga leeyahay Golaha ayuu yaalaa waa in gudida la soo mariyaa waa soo jeedinayaa oo waa in sida uu xeer-hoosaadku dhigayo loo dhaqmaa waana mid muhiima. Waxaa kale oo jirta xeerar ka degdega ah ee markaaba la fulinayo waa in la iska daayaa oo ay golahan soo maraan sida gawaadhidii lala wareegay barigii dhawayd.

Sidaa awgeed waxaan marlabaad soo jeedinayaa in u yeedhista wasiirada la soo horumariyo si wax looga waydiiyo qaladaalka jira ee shacabka lagula kacayo waayo waajib ayaa naga saaran ilaalintooda wsc.

**Md. Maxamed Cali Xirsi (Obama)** **(6min 02sec):-** Acuudu bilaahi mina shaydaani Rajiim, Gudoomiye waad mahad santahay, anigu waxaan u galayaa sidii aan u kala horaysiin lahaa sidii inoo caadada ahayd in loogu horaysiiyo Warbixinta shirgudoonka iyo warbixinta Guddida Joogta ah in Golaha Lagu bilaabo, warbixinta ugu muhiimsan ee la idinka doonayaa waa go’aankii aad Gudoomiye Faysal Cali waraabe ka soo saarteen oo aad la wadaagtaan Gole ahaan oo aynu halkan ka doodno oo aynu isla eegno, waayo golahani waxa uu ka hadlayaa waa in uu sharci noqdo, waxa uu ka doodayaa waa in uu

sharci noqdo oo aynaan wax uun saxaafada iska galin ee aynu hubino, go'aankaa ay gudidu gaadhayna waa in Golaha la hor keenaa.

**Gudoomiye Baashe;** Xildhibaan Maxamed Cali Ajandaha ku soo noqo. Okey Gudoomiye, xeerka Doorashooyinka sidii mudanayashii hore ka dhawaajiyeen waa in aynu golahan ku hogaamino sidii ay doorasho uga dhici lahayd, oo aan la inoo arag kuwo ku dhagan meesha ee sidaa sadexda xisbi isla qaateen, inkastoo aan u arko inay qaldanyihiin, waayo komishanka ayaa wax qiimeeya, komishankaa wax ku dhawaaqa, markaa isaga ayaynu ka sugaynaa go'aankii uu qaadan lahaa.

Markaa anigu waxaan qabaa in aynu iska diyaarino wixii dhankeena ku qabyada ah ee uu ka midyahay waxyaabihii xeerka ku xidhan ee doorashooyinka ah inaynu hoos u eegno. Waxaa kale oo aan ku raacsanahay xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid arimahan xeerarka isa saaran oo dhamaantood la wada eego ayaa wanaagsan oo aynu muhiimad gaar ah siino marka warbixinta gudidu ay soo dhamaanto ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan qodobka 2aad ka dhigayaa wax-ka beddelka iyo kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka, waayo waa xeer aad u muhiim ah ee waa in labadaa la israaciyaa. Waxaa kale oo aan ku xigsiinayaa oo aan ka dhigayaa qodobka 3aad wax-ka beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Asxaabta, qodobka 4aad waxaan ka dhigayaa xeerka Tamarta, qodobka 5aad waxaan ka dhigayaa Qabyo Qoraalka Xeerka Sahaminta shidaalka iyo soosaaridiisa, Qodobka 6aad waxaan ka dhigayaa Qabyo Qoraalka xeerka Dhakhliga shidaalka.

Waxa inta badan Gobolada barri la isku laayaa waa macdanahan la qodayo, markaa hadii aan xeer loo samayn waxaan qabaa in ay sii soconayso arintaasi, waxaanan qabaa in ayna golahan kaga baaqsan wixii ay deegaanadaasi xaq u leeyihiin oo aynu xeerka ku cadaynaa lana soo saaraa.

Qolooyinka baadha shidaalku waxay ku doodaan waxaanu sugaynaa waa xeerka ilaa xeerkaa la ansixiyana wax la qabanayaa ma jirto, sidaa darted waa in go'aan deg-deg ahnu ka gaadhnaa arintaa oo ay xeerarkaa sidaa isugu xigsiinaa.

Ugu danbayn waxaan Golahan u soo jeedinayaa kuna boorinayaa in aynu tusno Qaranka, shacabka in aynu diyaar u nahay in aynu shaqayno, waayo sidam kuma shaqayn karo ee waa in aynu saacadaha badinaa oo aynu galinka danbe shaqaynaa 20 xyidhibaana ha noqdeene, waxaa kale oo aan dhamaan raacsanahay xyidhibaanada soo jeediyay in wasiirada loo yeedho, oo shaqadeenu galinka danbe noqoto oo fadhi gooni ah aan ugu yeedhno aynu samaysanayaa 25xyidhibaana ha noqotee.

Waxaa kale oo aan golaha halkan ugu soo jeedinayaa inay wada cambaareeyaan masuuliyiinta goboladoodii aflagaadaynaya inta ay tv-yada fadhiistaan waxaanan odhanlahaa golaha halooga yeesho masuuliyiintii sida badheedhka ah u

aflagaadaynayay Gobolada Bariga, maaha in ay dhagaysano oo aynu eegno wasiir, ama badhasaab goboladii ay ka yimaadeen ku tilmaamaya aafo qaran, (3 mudane ayaa taageeray).

Mudane Gudoomiye, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro masuuliyiintaa kuwa ugu horeeya ee loo yeedhayo, oo aynu tusno awoodeheena, oo aynu tusno in aynu wasiirada ka sarayno, oo aynu tusno in aanay wasiiradu sida ay doonaan u hadli karrin waad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **(3min 16sec):-** Anigu marka hore waxaan sidoo u taageersanahay Soo jeedimihii iyo doodii Xildhiban Xuseen Caydiid iyo C/raxman Dheere waanan ayidayaa,

Waynu la soconaa oo wafuudo badan baa imanaya intaas sida kuwa Masar ka yimi, Jaamacada Carabtaynu ka mid ahayn markaynu isku jirnay laakiin maanta laba waddan baynu nahay, Itoobiya Xyidhiidh wanaagsan baynu leenahay, Djabuti waa tii lagu shirayay, marka waxay ila tahay sida la soo jeediyay masuuliyiinta khaaska u ah in loo yeedho sida Wasiirka Arrimaha Dibada, Waasiirka Caafimaadka si aynu wax uga waaydiino waan taageersanahay. Xildhibaan Xuseen Caydiid iyo Xildhibaan C/raxman Dheere dooddoodii boqolkiiba boqol waan raacsanahay. WSC.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan** **(9min 24sec):-** Shirgudoonka, Mudanayaasha sharafta leh, saxaafada dhamaantiina waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC. Waxaan ugu horeyn soo jeedin lahaa Gudoomiye iyo Shir-gudoon Warbixinaha inoo qoran in lagu soo daro sidii Xildhibaanadii iga horeeyay shalayto ay sheegeen Golaha in Wasiirada Qaranku u sharaxaan mudadii aynu kala maqnayn oo laba arrimood oo waaweyni dhaceen, midi waxay ahayd Wada-hadalka Somaliland iyo Somaliya ee DJabuti, marka waxaynu u baahanahay in Masuuliyiinta arrintaas gundhiga u ah ay Golaha timaado oo Golaha Warbixin ka siiso, waliba marka somaliya tidhaahdo wada-hadal baan dooneyna baynu u jawaabeynaaye in laga fikiro weeye sidee baynu Somaliland dhinaceena uga diyaar ahaan karnaaa ileyn danweyn baa inoogu jirta si aynu u kala baxne, marka in arrintaas ajandaha lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

Qodob kale oo muhiima oo ah Xanuunkan Covid19 waa aafo caalamka ku soo siyaaday, saameyntiisu waxay yeelaynsaa arrin dhaqaale oo weyn, waa run oo in dadka caafimaadooka la ilaaliyo oo laga shaqeeyo waa muhiim, laakiin saameynta dhaqaale ee uu keenay, inagu wax kasta dibadeynu ka soo dhoofsanaa, marka Qaran ahaan hadii xaalku inagu xumaado oo la waayo wixii la soo dhoofinayay, marka waxaan soo jeedinayaa in Masuuliyiinta ay khuseyso halkan yimaadaan oo inoo sharaxaan oo Ajandaha lagu daro.

Qodobka saddexaad ee aan ka hadlayaa waxa weeye, waad ogeydeen shaleyna waa laga hadlaye waxaad arkayseen maalintii dhoweyd Badhasaabada la isku badalay in rag

masuuliyiin ah oo magacii xukuumada ku hadlaya oo xilal sharaf leh haya inay dadkoodii iyo goboladoodii qaybna caayayaan qaybna amaanayeen, waa meel ka dhac, hadii wadankaaga qaybi xun tahay cay kaama istaahilo ee nasteexa kaaga haboon, marka waxaan odhan lahaa arrintaas oo waliba Xukuumadii aanay ka jawaabin, marka arrintaas Goluhu wax ka yidhaahdo maadaama dadka la aflagaadeeyay inagu aynu xildhibaano u nahay.

Dhinaca Xeerarka, waxaan aaminsanahay sidii shalay la sheegay jawiga yaala maanta Somaliland waa jawi doorasho, Golahanina sidaad ogtihiin eedo badan oo aanu istaahilin ayaa meelaha laga sheega oo masuuliyiin waliba ka sheegaan taaso oo habooneyn, Doorashada iyo qabashadeeda Xukuumada ka masuul ah oo iyadaa qabanaysa oo lacagta u ahaysa, hadii dib ay u dhacaan oo doorasho noocey doonto ha noqotee cid masuuliyadeed leh waa xukuumada ee maaha Golahan, Hadaba, Xeerarkaas inaga inagu xidhan ee Doorashada inaynu ugu horaysiino oo is dhaafino ayaan soo jeedinaya sidii shalay la sheegay, yaan la odhan Xeerka doorashada lagu galilahaa bay haystaane Xeerka Doorashada halkiisaa ugu horeysa ha ku jiro, wax ka badalka Xeerka Ururada iyo Asxaabta siyaasada, isagana kan labaaad ha laga dhigo isna Doorashada ku xidhan, waxaan ku sii xejinayaa Wax ka badalka Xeerka Tamarta, waxaana ku sii xigaya Xeerarka kale ee Wax ka badalka ah, Xeerarka kalena laga sii dambeysiiyo.

**Md. Xaamud Cisman Cigaaal** **(5min 52sec):-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Golaha, Saxaafada, kaaliyayaasha iyo marti-sharafta ASC, Gudoomiye waxaan marka hore soo jeedinayaa Xyidhiidhka inaga iyo Dalka Taiwan ina dhexmaray oo aynaan ka hadal mooyi wax dhacaye, waa inaynu iskaashigaas iyo xidhaadhkaas inaga iyo Taiwan bogaadinaa oo u codeynaa oo la arko in arrintaas Goluhu aad iyo aad u taageerayo, marka arrintaas Ajandaha ha lagu soo daro.

Waxaan taageerayaa soo jeedintii ahayd in Masuuliyiinta Qaranka loo yeedho, waliba anigu waan magacaabayaa oo waxaan soo jeedinaya in loo yeedho Wasaarada Waxbarashada iyo Xeer-ilaalinta, sababta aan labadaas ugu yeedhayo waxa weeye waad ogtihiin in arrin foolxumi ka dhacday Dugsiga agoomaha oo inan yar oo maskaxda ka xanuunsaneysa lagu fara-xumeeyay, arrintaasi waa dambi marka arrintaas wixii laga qabtay ayaan doonayaa inayu ogaano.

Shirkada Barakaad oo halkan Telesom ah, Boosaasona Golis ah, Muqdishona Hormood ah, halkan markii la bilaabay halka dollar 27 Minute baa lagu hadli jiray, iminka 10 minute, kuwas kalena waxba kama badalin, marka maxay sida u sameynayaan oo dadka lacagtoodi ay ku hadlayeen uga shubanayaan, Marka qoladaana waa in loo yeedho oo lala xisaabtamo.

Waxa kale oo aan doonayaa in la soo horeysiiyo Xeerka Doorashada isaga waa la sheegay marka waxaan doonayaa in la soo horeysiiyo Xeerkii Kufsiga oo Xeerkas la soo dedejiyo,

ciqaabtu lahaa la keenaa oo kan kowaad laga soo dhiga. Sidoo kale waxaan jeclahay inaan raaciyo waxyaabo badan baa ajandaha ku jira waxaana dhici karta inaynaan kal-fadhigan kawada gaadhsiin karrin, marka waxaan soo jeedinayaa siday u kala muhiimsan yihiin inaynu u soo kala horeysiino oo waliba Xeerka Kufsiga ugu soo horeysiino. WSC.

**Md. Ibraahim Caraale Cabdi** **(5min 50sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waxaan idinku salaamaya Salaanta Islaamka ASCWB, ugu horeyn sida ka muuqata warqadan horteyda taal ee Ajandaha lagu soo diyaariyay marka laga tago Warbixinada Shir-gudoonka, Gudidda Joogtada iyo Gudiyada kale ee Golaha waxaan qodobka saddexaad laga dhigay oo aan anigu kan labaad ka dhigi lahaa u yeedhista Masuuliyiinta Qaranka waayo markaad xog heshaa baa talo la helaa, waxyaabo badan oo aynu war uga baahanahay baa jira, waxa ugu horeysiin lahaa sidii Xildhibaanaidi iga horeeyayba sheegeen Wasiirka Caafimaadka si aafadan ba'an ee aduunko dhan ka dhacday ee saf-marka ah uga wareysano, Wasaarada Arrimaha Dibada oo aynu Warbixn uga baahanahay, waxaan ku saddexayn lahaa Maareeyaha Hay'adda Madaarada, saddexdaas masuul waan ku raacsanahay Xildhibaanadii iga horeeyay.

Inta marka laga yimaado waxaan ku faraxsanahay in xildhibaanadu dareen isku mid ah ka muujiyeen in Xeerarka Doorashooyinka oo maanta dalku doorasho diyaar u yahay, wuxuu Golahani hore diyaar ugu ahaa iminka diyaar ugu yahay in aanay Golaha ku baaqan Xeerarka xanibaya doorashada, waxaan la qabaa Xildhibaanada in dhamaan Xeerarka sahlaya in doorasho dalka ka dhacdo xageena diyaar ka ahaado oo fududeyno uguna horeysiino dhamaan Xeerarka u adeegaya Doorashada oo uu ugu horeeyo Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Codbixiyayaasha, sidoo kale in Xeerka Ururada iyo Axsaabta laga dhigo kan labaad oo isna doorashada ku khuseeya, waxaan ku soo xijin lahaa Xeerarka la geeyay 11aad, 12aad iyo 13aad ee Wax ka badalka Tamarta, Sahminta shidaalka iyo Dakhliga shidaalka in laga dhigo saddexaad, afraad iyo shanaad, xeerarkaas saddexda ahi waa Xeerar dalka manfac u leh oo ay tahay in si fiican looga shaqeeyo, hadii ay maqnaadaan dhibaatooyin badan ka iman karaan maqnaanshohooda madaama loo baahan yahay shaqadii wax Xeer ah oo lagu maamulaana aanu jirin, marka Xeerarkaasi waa xeer dalku u baahan yahay.

Lixaad waxaan ka dhigi lahaa Xisaab Xidhka 2018, Xeerka Saxaafada ayaan todobaad ka dhigi lahaa, sideedaadna waxaan ka dhigi lahaa Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka, marka sideedaas Xeer baan ugu soo horeysiin lahaa wixii ka dambeeyana hadii kal-fadhiga Goluhu ka gaadho.

Marka Sidaan hadalkeyga ku bilaabay dareenka Goluhu muujiyay oo ah dareen shacabka loo muujinayo inaan Golahani doorashada hor-taagnayn, waxa kale oo aan soo jeedin lahaa hadii Xisbiyadu doorashada marna dabraan, mar kalena la dadejiyo oo si aan munaasib ahayn loo dedejiyo waxa dhici karta inay dalka dhibaato ku keento, waxa loo baahan yahay in si wanaagsan oo masuuliyadi ku jirto oo aan dadka iyo dalka waxba

yeelayn doorashadii loo qabto oo loo daayo hay'addaha ku shaqada oo iyaguna si degan u qabtaan haday 2020 ku qabanayaan iyo haday 2021 ku qabanayaanba, marka dalkuna doorasho wuu u baahan yahay, in laga shaqeeyo degaanaanshihiisa iyo hagaagiisana wuu u baahan yahay. Intaasan kaga baxayaa. WSC.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil** **(7min 41sec):-** Gudoomiyaha iyo Xildhibaanadaba waan salaamayaa, ugu horayn waxaan soo jeedinayaa in sida mudanayaal badani soo jeediyeen in loo yeedho Guddidii Coronaha oo xaalada guud ee cudurkaa wax laga waydiiiyo, waayo Madaxweyne ku xigeenku wuu qaaday dhamaan waxyaabihii laga hortagi lahaa, hadana waxaad habeen walba maqlaysaa qaar ayaa la helay, Dhaka dawladana wax warbixin ah oo laga hayaa in uu yaraaday iyo in uu wali jiro ma hayno.

Waxaa kale oo cudurkani soo kordhiyay culays dhaqaale iyo mid siyaasadeedba oo maanta waa laga warhayaa halka ay marayso, oo tusaale ahaan aad ka warhaysaan in khudaartii inooga iman jirtay Ethiopia aanay jirin ama ay joojiyeen oo kiilooga tamaandhada ahi ay marayso 35,000 SLshl halka ay awal ka ahayd 8,000 SLshl, waxaanay ahayd in ay dawladu la timaado qorshe qaran oo ah Coved-19-ka.

Waxaa kale oo aan ku darayaa wasiirada loo yeedhayo in lagu daro wasiirka beeraha oo la waydiiyo wixii qorsha waran ah ee uu u hayo dalkan, iyada oo la waayi karo dhamaan khudaarta inooga timaada Ethiopia, sidoo kale waxaan ku dari lahaa Wasiirka Tamarta, oo ha la waydiiyo sababta loo magacaabay gudida Komishanka tamarta isga oo uu xeerkii la inagu soo celiyay oo aynu gacanta ku hayno, markaa guddidaasi waxay garab marsantahay xeerka isaga oo aan xeerkiiba inaga bixin. Sidoo kale waxaan jeclahay in wasiiro badan loo yeedho oo ay ka waramaan siyaasada arimaha gudaha iyo dibadaba.

Hadii aan u imaad sida loo kala horaysiinayo ajandaha waxaan sidii la sheegay **Qodobka 1aad ka dhigayaa Xeerka Guud ee Doorashiiyinka, Qodobka 2aad waxaan ka dhigayaa Xeerka Ururada iyo Asxaabta,** Xeerka Tamarta waxaa iigu danbaysa isaga oo gudida hor yaala oo aanu madaxweynuhuna aanu sexeexin, Madaxweynuhuna muu soo celin oo 2/3 inoogama baahna, markaa hadii uu madaxweynaha ka soo noqday 2/3 ayuu u baahanayaa, markaa halkaa ay ku qoran tahay Madaxweynaha ayaa soo Celiyay halaga badalo ayaan odhan lahaa.

Xeerka sahaminta shidaalka waxaa la isku ogaa in la keeno heshiisyadii lala galay shirkadaha shidaalka, oo ay ka mid ahayd waxyaabihii uu xeerku dib ugu dhacay markii hore, walina waa la sugayaa, markaa waxaa ka horeeya xeerka in wasiirka loo yeedho oo uu keeno heshiisyadaa, waayo macdanaha la guranayo ayaa meesha ka bixi lahaa (waxaa uu helay 1 taageero).

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in Golaha la keeno heshiisyada calaamiga ah si loo ansixyo, sidoo kale dhaqdhaqaaqa siyaasadeed ee Taiwan waa in la isku miisaamaa maxaa faa'iido iyo khasaare ay inoo leedahay.

Markaa waxaan leeyahay Saddex Xeer ka badin mayno kal-fadhigane hala inooga soo saaro Xeerka doorashooyinka, xeerka Ururada iyo Asxaabta iyo Xisaab xidhakaa 2018-ka intaa ayaan laga badin ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi** **(15min 57sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Saxaafadaba iyo Dadweynahaba waan salaamayaa, waxaan doonayaa in hadii ilaahay idmo in ajandaha i horyaala in aan dhawr arimood oo aan qaarna ku taageerayo mudanayaal hore, qaar kale si kale aan ugu hadlo mudanayaal Soomaalida ayaa waxay tidhaa "*Hoosba Hadal leh*" maalintii la isku yimaadaaba waxay leedahay ajandeheeda iyo wixii la sugayay.

Markaa maanta waxa ugu badan ee la inaga sugayaa waa wixii doorasho ku saabsan oo xeerar ah ayaa la inooga fadhiyaa, halkan marka aan eegno waxaa ku jira laba xeer oo kala ah **Xeerka Ururada iyo Asxaabta iyo Xeerka Doorashada Guud iyo Diwaan Galinta** labadaa xeer wey isku Abtirsada Doorashana wey wada khuseeyaan.

Waxaan ugu soo horaysiinayaa ka Ururada Sababta ugu mihiimsani waxay tahay ururada marka la furayo waxaa la doortaa dad (akhshaas) ee ajande la raacaa majiro, waayo reer walba liis ayuu soo qoraa reer walibana waxa uu eegtaa meesha uu qofkoodii ku jiro sidaa ayaana loogu codeeyaa.

Markaa waxaa lagama maarmaan ah in aynu taa kala qaadno oo maalinta ururada la furayo urur kaliya loo codeeyo oo doorasha xubnaha Golaga deegaan kana mar gaar ah loo codeeyo oo qofka kaliguu la doorto, arintaasi way iskaga keen qaldantahay waxayna ku jirtaa xeerka, xeerka doorashadana saamay ayay ku leedahay.

Tusaale ahaan Ururka uu Abdiqadir Jirde Samaystay ayaa la dooranayaa, Ajandihiisa ayaa la raacayaa, markaa waxay ku haboontahay in aynu taa kala qaadno dadkana sidaa ugu sheegno, si ay inoogu soo baxaan xisbiyo/Ururo Tayo lihi.

Sidoo kale waxaa isna muhiim ah oo xildhibaano badan oo halkan ka hadlayna aan kaga duwanahay Xeerka Doorashooyinka oo la leeyahay waxay ku xidhan tahay doorashadii xeerkiina ina horyaalo, in dadka la marin habaabiyo maaha xeerka waxaa la inoo soo gudbiyay 2018-kii inta doorasho ee ka horaysay ee baaqatayna waynu ka war haynaa.

Sidaa daraadeed waxnu habsaaminay ma jirtee, xeerka maanta ayuu ina horyaalaa iyada oo wixii caqabado ahaa ee xeerkan dabrayay laga gudbay lagana heshiiyay, wixii kale ee gudihiisa ku jirana waa laga heshiin doonaaye, waa in aynu garanaa in aynu samayn karno xeer aynu ku heshiin karno.

Sidaa daraadeed Xeer aynu hore u hayn jirnay oo aynu doorashada u habsaaminay ma jiree, xeerka maanta in horyaalaa waxa uu u baahanyahay muhiimkana u yahay ee ayna doorashaduba aanay u suuro galayn waxaa waayeen maynaan lahayn, marka laga reebo Doorashada Madaxweynaha iyo Golayaasha Deegaanka, maanta si looga wada qabto

doorashooyinka isku sidkani inoogumay oolin xeerka, ee maanta ayaynu rabnaa in aynu xeerka waafajino kana dhigno in saddexdaa doorasho hal sanduuq ay ka wada dhacaan in lagu cadeeyo, maadaama ayna taasi ku cadahay komishankana aanay gacantiisa ku jirin, oo doorashooyinka hada la isku sidkayna aanay isku sidkami karayn oo ay xeerka ugu taalo iyada oo liis ah iyo mid qof la dooranayo, waxaa la inaga sugayaa in aynu xeerka midayno oo ay inaga baxaa Xeerarka doorashadu iyaga oo dhamaystiran.

Waxaan xildhibaanadii iga horeeyay aan ku raacsanahay in xeerarkaa Golaha yaala la soo horumariyo, sidoo kale waxaan Xuseen Axmed Caydiid ku raacsanahay xeerarka Golaha horyaala ee xeerka Saxaafada, Xeerka Mukhaadaraadka, ee lagu soo timaamay inay xeer yihiin, waxaa hore u jiray xeerar ee ha la iswaafajiyo xeerarkii hore u jiray oo gudiyada ha lagu celiyo hadii uu yahay wax ka beddelna waa in lagu qoraa wax-ka-beddel iyo kaabis.

U yeedhista masuuliyiinta, marka hore way mudanyihiin in wixii wax qabad ah la bogaadiyaa ayay mudanyihiin sida Wasaarada Arimaha Dibada iyo Arimaha Guduhuba. Oo tusaale ahaan wasaarada arimaha guduhu rabshadihii jiray hada gacanta ayay ku haysaa dhamaad ayayna ku dhawyihiin, wasaarada Arimaha Dibaduna dhaq-dhaqaas wanaagsan ayay wadaan, markaa labadaba waan in la bogaadiyaa.

Sidii ay ahaan jirtay ee awalba warbixinaha inoo siin jireen waa in aan ugu yeedhanaa masuuliyinta Xukuuda, arimaha Caafimaadka mashaakil balaadhan ayaa dhacay oo dadku way qaylinayaan oo qaylo badan ayaa jirta, oo dadka qaar ayaa wax tuhmi kara, markaa cida ay tahay in wax la weydiiyo oo sida ay wax u wadaan la waydiiyaa waa Guddidii, sidaa daraadeed waxaan qabaa halka la wajahayaa in ay tahay guddida.

Waxaa kale oo jirta sida ay xildhibaanada qaar Xuseen oo aad moodo in ay ajandaha ka baxsan tahay sheegeena in lagu soo daro “arinta masuuliyiin caytantay oo Xukuumada ah” aniga oo aan u cudur daarayn, oo xildhibaanada ka hadlaya la dareen ah, hadana masuuliyadaha waa la kala leeyay, oo halkan maanta wasiirka inta aynu cod u qaadno ma eryi karno, ee waxaynu leenahay warbixin ku socota Xukuumada uu ka tirsanyahay u dirno, cadayn u dooni mayno may yidhaahdeen mise may odhan u dooni mayno, wasiirka iyo badhasaabka halka laga abaarayaa halkan maahee gudiyada ku shaqada leh ayaa soo qoraya shirgudoonkaa loo gudbinayaa isagaana Madaxweynaha u gudbinaya wax ka qabashadeedana isaga laga larabaa.

Arinta ku saabsan Shirkada Telesom iyo Ajandaha halagu soo daro, shirkadaasi waxay ka mid tahay shirkada gaarka loo leeyahay ee aynu mudanayaasha u nahay ee aynu halkan u fadhino ee waliba ugu waxtarka badan, markaa wixii baraha bulshada la isku marinayo ee dacaayad ah, inaga Golis iyo Hormuud midna inama hoos timaado shaqadeenan maaha.

Waxa ay Somaliland ay leedahay waa Telesom ee wixii caabasha dhaqaale ah waxaa leh Gudidda Daqaalaha ee Golaha oo ay tahay cidii cabanaysaa inay la soo xyidhiidho oo wadada sharciga ah ee laga rabo inay marto waa inay martaa. Markaa waxaan leeyahay hadii ay cabasho jirto waa in ay ka shaqaysaa Gudidaasi oo ay tagtaa meelaha laga cabanao garana maayo wax ku jira oo ajandaha loogu soo daraa.

Xaga kala horaysiinta waxaan ka dhigi lahaa Xeerka Ururada, Xeerka Doorashooyinka waxaan isna kor u soo qaadi lahaa Xeerka Tamarta iyo xeerka kufsiga oo la siku khilaafsanaa dhanka shareecada oo u baahan in guddidii aanu waxbixin ka dhagaysano, sidoo kale xeerka tahriibinta dadka waxaa jiray xeer hore isna waxaan soo jeedanayaa in kaalinta 4aad meelaha la keeno ayaan soo jeedinayaa. Xeerka dhaliga shidaalka waxaan leeyahay marka sahamintiisa iyo soosaaristiisa aynu dhamayno ayaa dakhliga loo imanayaaye waxaan soo jeedinayaa in dib la iskaga dhigo.

Waxaan ku talinayaa maadaamo oo ay xeerka doorashadu ina horyaalaan, yaynaan wakhti badan ku luminin u yeedhista wasiirada e waa in aynu fudaynaa sida loogu yeedhayo si aanay wakhti inooga qaadan ayaan soo jeedinayaa aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Axmed Cabdi Nuur (kijaandhe)** **(6min 52sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Gudoomiye waan ku salaamayaa, xubnaha Golahana waan salaamayaa, mudanayaashii iga horeeyay waxaan ku taageersanay in Wasiirada la waraysto sida wasirada Arimaha Dibada, Arimaha Gudaha Iyo wasiirka Caafimaadka.

Waxaan ugu horaysiinayaa xeerka doorashooyinka si aanay dadweynuhu u moodin in aynu inagu hor taaganahay doorashada. Sidoo kale waxaa soo jeedinayaa in gudoomiyayaasha gudiyada laga talo galiyo samaynta ajandaha si loo eego muhiimada xeerarka ku jira ajandaha.

Waxaa kale oo aan ka 2aad ka dhigi lahaa xeerka shidaalka iyo wixii la halmaalo, waayo xeerkaasi in mudo ah ayuu soo noqnoqonayay muihiimad dhaqaalena wuu u leeyahay dalka, markaa xeerarka dhawrkii sano ee u danbeeyay soo noqnoqonayayna waa in laga shaqeeyaa sida xeerka saxaafada, waxaanan soo jeedinayaa in aynu dhawr galbood soo noqono si aynu uga shaqayno doorashooyinkiina wey soo dhawyihiine.

Xeerkii baanka malaha duco ayaynu siisanee waa in isna ajandaja lagu soo daraa ayaan soo jeedinayaa, sidoo kale xeerka Shaqaalaha Rayidka ee shalay la keenay hadana ajandaha ku jira waxaan filayaa in la soo kootarabaaniyay ee waxaan leeyahay waa in muhiimada la siiyaa xeerarka mihiimka ah, waad mahadsantihiin.

**Gudoomiye Baashe;** Doodii halkaa ayay ku dhamaatay bari waa la isku soo hagaajinayaa waana inoo sabtida Fadhiguna wuu xidhan yahay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ___________________________ | ___________________________ |